

Lam: MW/DPS/MM/99, Luulyo 10.10.1999 *photo copy*

FAAFINTA



RASMIGA

الرسمية

الجريدة

DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND SOOMAALIYA

لولاية أرض بونت الصومالية

Sannadka 1<sup>aad</sup>

Garowe, 1da Octoober 1999

Lam, 10

FAAFINTA BILWALBA KA SOO BAXDA

جريدة شهرية

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland

Qiimaha : waa Sh.So- 10.000 lambar walba. Rukunka Sannadkii waa Sh.So.-170.000 dalaka gudhiisa, dibaddana waa Sh.So.500.000-Rukunka la waydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilowdaa 1da janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So. 3.000 Rukunka iyo Qoritaanka waxaa la waydiistaa Qaybta Maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda.

TUSMADA

Qaybta Koowaad

SHARCI

Waxba ma leh

Qaybta Labaad

Xeer

- ◆ Xeer Madaxweynaha D.G.P.S. – lam. MW/DPS/MM/99 ee Luulyo 10,1999 “ U gudbinta dakhliga dowladda ee la qabto oo dhan 24 saac gudahood, khasnadda dhexe ama qaybta dakhliga berriga ee Wasaaradda Maaliyadda ee ugu how” ..... Bogga..... 130
- ◆ Xeer Madaxweynaha - D.G.P.S. Lam. 44 ee Augst 20, 99 “Magacaabidda Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Howlaha Guud iyo Gaadiika” ..... Bogga.....132

Qaybta Saddexaad

Talooyin , Isgaarsiin, Ogaysiis IWM.  
Waxba ma leh



DAWLADDA PUNTLAND  
EE SOOMAALIYA

PUNTLAND STATE OF  
SOMALIA

**XAFIISKA MADAXWEYNAHA**

Sum: MW/DPS/1111/99

Garoowe, Luulyo 10, 1999

- Madaxweynaha Dawlad Gobolleedka Puntland:
- Markuu arkay Axdiga Dawlad Gobolleedka Puntland qodobka 12.5
  - Markuu arkay Sharciyada iyo Xeer-nidaamiyaha u degsan xisaabaha dawladda.
  - Markuu arkay Xeerarka iyo habraacyada u degsan hubinta, uruurinta iyo soo xeraynta dakhliga dawladda (cashuuraha, xuquuqaha {rights}, hantida, khidmadda, iwm).
  - Markuu arkay Sharciga miisaaniyadda dawladda
  - Markuu arkay Xaaladda miisaaniyadeed ee dalku ku sugan yahay
  - Markuu arkay Talo soo jeedinta Wasiirka Maaliyadda ee la xiriirta "sugidda xasilloonida miisaaniyadda" (financial stability).
  - Markuu iixgeliyey duruufaha guud ee maaliyadda dawladda Puntland

Madaxweynaha Dawladdu wuxuu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1-aad

1. Waa in hay'adaha, wasaaradaha iyo maamullada madaxa bannaan ee D.G. Puntland ee farsamo ahaan (for technical reasons) u qabta dakhli dawladda u sharcigaroobay, ay wadar ahaan dakhliga soo gala u gudbiyaan 24 saacadood gudahood khasnadda dhexe ama qaybta dakhliga birriga ee wasaaradda maaliyadda ee ugu dhow.
2. Waxaa la mamnuucay in hay'ad ama xafiis dawladeed oo aan ka tirsanayn Wasaaradda maaliyadda ay ku baajiso khasnadaheeda gaar ahaaneed "dakhli dawladdu leedahay" oo aan sharcigu u ogolaan muddo ka badan 24 saacadood.

Qodobka 2-aad

1. Isticmaalka dakhliga iyo isu-tuuridda dakhliga iyo kharajka waxaa loo aqoonsanayaa Xatooyo xoolo dadweyne.
2. Qayb kasta oo dawladda ka mid ah waxaa waajib ku ah in ay raacdo nidaamka maamulka maaliyadda dawladda ee xeerinaya in kharajka hay'aduhu ku jaango naado ku talogalka miisaaniyadda, dakhliguna si toos ah ugu ururo khasnadda dawladda.

Qodobka 3-aad

1. Wasaaradda maaliyaddu waxay ku amran tahay xilna ka saaran yahay hagidda in ay la socoto warbixinna ka soo saarto lacagaha qaybaha kale ee dawladda ku soo xerooda ayna tahay in ay miisaaniyadda dhexe ku soo wareegto.
2. Wasaaraddu waxay tallaabo maamul oo sharciga waafaqsan ka qaadi kartaa xafiis kasta oo dawladda ka tirsan dakhliina uu ku soo ururo haddii uu raaci waayo sharciga miisaaniyadda dhexe ee Dawlad.

Qodobka 4-aad


1. Wasaaradda maaliyaddu waa in ay gaarsiisaa dhammaan xafiisyada dakhliga soo saara wareegto tifaf-tiran oo loogu tilmaamayo habraaca (procedure) iyo diiwaannada rasmiga ah ee loo isticmaalayo uruurinta iyo xereynta dakhliga.

Qodobka 5-aad

1. Hantidhawrka dawladdu tallaabo sharci ah ayuu ka qaadi karaa hay'addii ku xad-gudubta xeerarka iyo habraacyada u degsan maamulka lacageed ee maaliyadda dawladda.

Qodobka 6-aad

1. Waxaa la buriyey Sharci/Xeer kasta oo aan la socon karin ama ka hor imaanaya xeerkan.

  
Cabdullaahi Yuusuf Axmed  
Madaxweynaha Dawladda Puntland

